



SOMALI

WA MAXAY KORONAFAYRUS-KU?

Koronafayras-yadu waa koox fayrasyo ah oo xanuun u keena bani-aadamka iyo xayawaanka. Dadka oo xanuunkan ku dhaco wuxuu u keenaa caabuqyo neef-mareenka sida hargabka caadiga ah iyo cuduro kale oo halis ah.

WA MAXAY COVID-19?

COVID-19 waa xanuunka dadku isku gudbin karaan oo ka tirsan fayraska cusub koronafayras ("CO" waxay ka dhigan tahay corona, "VI" waa fayras, "D" waa xanuun iyo "19" sanadkii u la ogaaday). Fayraskan cusub iyo xanuunkan oo hore aqoon loo lahayn waxay ku soo ifbaxeen magaalada Wuhan ee wadanka Shiinaha bishii laba iyo tobnaad ee sanadkii 2019.

WAA MAXAY ASTAAMAHA QOFKA UU HAYO COVID-19?

Tastaamaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah qandho, daal iyo qufac. Kiisaska ugu halista badan, infekshanku wuxuu sababi karaa oof-wareenka, xanuunka neefsashada ee aad ka u daran iyo ilaa dhimashada.

ICOID-19KU MUU LEEYAHAY TALAAL AMA DAAWO?

Ilaa iyo hadaa lama helin talaal rasmi ah ama daawooyin lidka-fayraska si looga hortago xanuunka COVID-19-ka. Hasayeeshee, dadka uu xanuunku ku dhacay waxaa laga daweyn karaa astaamaha xanuunka, kuwa xooga u jiran waa in isbitaalka la dhigo. Bukaanka badankood waxay ka helaan daryeel caafimaad iyo tageero. Waxaa la baadhayaa daawooyin looga reysan karo.


WAA CIDEE DADKA UGU NUGUL XANUUNKAN?

Si kasto wali la baranayo siyaabaha faafintaanka COVID-19ku, waxaa la sheegay in ay khatar ku jiraan dadka wayeelka ah iyo dadyawga la nool xanuunada dabo-dheeraada, sida dhiig karka, sambab xanuun, wadna xanuun, kansarka iyo macaanka.

SIDEE AYAAN ISKAGA DIFAACI KARAA CUDURKAN IYO DADKA KALANA UGA ILAALIN KARAA?

Waxaa jira talaabooyin la qaadi karo oo markaa ku caawinaysa inaad ka hortagto faafitaanka COVID-19ka:

- ku dhaq gacmahaaga had iyo jeer saabuun iyo biyo ama aalkohoosha gacmaha nadiifisa si aad uga dishid fayraska gamahaaga.
- AHa u dhawaan dadka, waa inaad 1 mitir inii dhaxeeyo. Fayrasku wuxuu ku jiraa dhibcaha ee yaryar ee candhuufta, waxaana laga kala qaadi kara neefta marka la isku dhow yahay iyo walibana marku qofka jiran qufacayo ama hindishoonayo iyo markay qandho leeyihiin.
- Ha is taaban indhaha, sanku iyo afka waayo waxaa dhici kara inay gacmahaagu ay sidaan xanuunka oo ay u tabin karaan indhaha, afka iyo sanku kadibna jirko dhan..
- Marwalba waxaad hubisaa in adiga iyo dadka ku dhaw ay si sax ah u raacaan hannaanka saxda ah ee lagu xaqiijiyo nadaafadda neef mareenada. Waxaa muhiim ah in qofka uu daboolo afka iyo sanku. Marwalba oo aad hindishotid waxaad ku dedaashaa in ad isticmaasho marin ama xaanshi nadiif ah. Tani waxay adiga iyo dadka kale ee kugu ag hareereysan idiin ku caawineysaa in uusan xanuunada sida hargabka iyo fayraska COVID-19ku faafin oo aan la qaadsiinin dadka kale.
- Iska ilaali is-gacan-qaadka iyo dhunkashada. Guriga joog hadii aad jirantihid. Hadii aad leedahay qandho, qufac ama neefsashadu ay kugu adagtahay, wac xafiiska dhakhtarkaaga, isaga ayaa ku sheeqi halkaad tegi kartid. Sidaa ayaad isku ilaalin kartaa oo uga ilaalin karta dadka faafinta xanuunkan iyo kuwa kalaba



All the measures included in the present leaflet follow what established by the world health organization (WHO)